

Ma waxa aan u baahanahay aqoonsi si aan u helo talaalka BILAASHKA AH ee COVID-19?



Qof kastaa wuu is talaali karaa. MAAHA inaad haysato caymiska caafimaadka, ama tahay muwaadin ama deggane Maraykanka. Maaha inaad keento lambarka sooshiyaal sikiyuuritiga si aad isku talaasho, laakiin bixiyayaashu way dalbadaan si ay u heli karaan lacagta talaalka.

Hadii aanad xasuusan lambarkaaga sooshiyaal sikiyuuritiga ama hadii aanad haysan, kaliya waxa aad ku jawaabtaa "maya" marka lagu waydiyo. Wax macluumaad ah ma siiyan ciidamada laanta socdaalka ama bilayska.


Talaalku waa u BILAASH qof kasta. Hadii aad leedahay caymis, bixiyayaasha talaalka ayaa ku dalici kara kharashka talaalka caymiskaaga, laakiin adiga wax kharash ah lagaama qaadayo ama hadhaw laguuma soo diri doono.

Waa inaad soo qaadato wax uu magacaagu ku qoran yahay (sida aqoonti sawir leh, risiidhka kharashka adeegga laydhka iyo biyaha ee aad bixisay, ama warqad uu saxeexay qof sheegayo cidda sheegeyso inaad tahay).

Tusaalayaasha noocyada aqoontiga aad isticmaali karto ee magacaagu ku qoran yahay:



Aqoontiga dawlada ajaanib ahi
ay bixisay



Aqoontiga dugsigu bixiyay



I-94



Liisanka gaadhiga ama
baasaboor dhacay



Kaadhma wadista gaadhiga
oo dal kale bixiyay



Warqada kharashka
adeegyada biyaha iyo laydhka



Warqad kale oo uu ku yaal
magacaagu



Aqoontiga hoyga